

Malaa'ig duureed

W/Q: Warsame Cumar Xuseen “Shiidleey”



Waa aan kuu xiisay. Si xad dhaaf ah ayaa aan kuu jantay. Waligey isma oran waa aad is waayaysaan. Wayse dhacday! Waa aan is kaa siiyay. Wax kasta oo aan lahaa ama ahaa ayaa aan kugu aamminay. Ma xusuustaa is barashadeenni layaabka lahayd? Haa dheh! Sidee u iloobi kartaa? Jamallada waaweyn ee xeebta Liido ayaa aan ku akhrinayay buugga “*Ayaan daran.*” Galab laydh qaboobi jirto ayaa ay ahayd. Kolki aad ka soo muuqatay dhanka gabbaldhaca, ayaa uu i galay dareenkii ugu horreeyay. Dareen sees u noqday waayo jacayl ah. Waligayba waa aan ku aqaannay malaha. Maya’e dookheyga ayaa ku yaqaannay! Inti aan soo qaangaarayba sawirkaaga ayaa aan laabta ku sitay. Rumayso ama ha rumaysan! Waa sidaa xaalku.

Qofka kaliya ee aan la nolaashiyihiisa xiiseyn jiray isla markaana aanan aqoon ayaa aad ahayd. Marki aad xaggayga usoo laafyoonaysay, aad ayaa aan kuu dhowrayay balse ma aan moodayn in aan mar kaliya ku soo jalleecay. Hir biya ah ayaa aad ka boodday si aysan kabahu kaaga qoyin. Muuqaalkii ugu horreeyay ee i dhaawacay kolkan ayuu dhashay. Maxaa aan arkay horta? Kub cad oo murqa leh ayaa aan arkay. Fallaaraha cadceedda oo ku dhacay nuurka dhabankaada oo aan ka dhex daawanayay buugga xaashiyihiisa cadcad ayaa aan arkay. Murugadi Asli ee aan akhrinay, ayaa ay nuur iiga dhigeen. Alla qurux badnaayaa foolkaagu. Midabkaagi dahabiga ahaa, sanqaroorkaadi taagnaa iyo sunniyahaaga dhicanyada is ku hayay waxa aan hubaa in ay ahaayeen abuur Eebbe oo aad dheertahay hablo badan. Noocaaga oo kale reer miyigu “*malaa’ig duureed*” ayaa ay dhahaan, qolyaha suugaanta

daneeyaayina “suleekha” ayay ugu heesaan, jannadana “*xuurul-cayn*” baa laga yiraahaa. Kolki aad fariisaneysay dhuxunka igu xigay, dhowr jeer ayaa aan dhex iska celiyay aniga oo doonayay in aan maro kaa xijiyo qoyaanka jamalka! Qoyaanka ay hirarka biyaha ahi jamalka saareen. Boorsadi aad sidatay sidii ayaa aan u xusuustaa! Midabkeedi cowlanaa sidii ayaa aan xiska ugu hayaa. In kasta oo marka aan gabar kale ku arko aan dhagixii dul fariisto, haddana ma hilmaamo.

Buugga aad kala soo baxday boorsada ma u maleysaa in uu aniga iga hadlayay –“*Someone To Love Me.*” Xaqiiq qofka hadda ku jecel waa aniga. Ka hor falkii quruxda badnaa ee wax badanna sababta u noqday inta aadan sameyn, halkii saac ee aan meesha fadhiyay ma rumeysaneysaa in aan hal bog oo buuggii aan sitay ahaa akhrin? Layaab ayaa aad u qaadan doontaa! Laakiin halkaa saac waxa aan akhrinayay wajigaada. Alla maxaa naxariis ka muuqatay. Sida oogta waaberi ayaa uu u ifayay. Sunno ayaa ka muuqatay. Hal mar ah ayaa aad igu qabatay aniga oo ilqooreedda kugu xadaya. Waa kolkii labaad ee aan dhaawacmay. Alla madow badnaayaa afkii aad iigu dhoolla cadeysay. Oo maxaa aad iigu dhoollacadaysay? Maxaad iga dhibaysay? Jacaylku waa dhib! Ilkaha aan kala-dheerada lahayn ee sida qurxoon ugu safan faruuryahaaga hoostooda ayaa cajiib kale ahaa!

Haddii aanad i soo dul istaagi lahayn run ahaan halkaa ayaa uu gabbalka iigu dhici lahaa. Ma illaawin hadalkaadi koobaad ee dhagahayga ku soo dhacay ee ahaa “*dear sawir ma kula geli karaa*”? sabab kale sidaa uma aadan oran oo waa aan hubaa, ee timahayga weyn ayaa si sixir ah kuu soo jiitay. Tamahaygoow Ilaahay wax idin bidiya iyo bidaarba idanka dhowr. Sababta aad sidan u yeeshay waxa ay ahayd sheeko aad ku maqli jirtay darteed. Soomaalidii hore waa ay timoweynaan jireen ayaa aad dadka ka maqashay. Aad ayaa aan ugu farxay kolki aad sidaa i tiri –“*dear sawir ma kula galaa*”. Waxa aan aamminay in aan ku helay. Isma ogeyn markii aan is taagayay biyaha dhexdooda laakiin waxa aan is gartay marki aad igu tiri “*sorry kabihi ayaa kaa qoyay.*” Jawaabteyda waa aad sii garanaysay in ay noqon doonto “*dhib malahan*”. Madaxa ayaa aad ruxday. Taasina waxa aan u fahmay in aad jawaabteyda ku qanacday.

Daqiiqadahaa wax cinwaan ah kuma weyddiin, maxaa yeelay awood aan kugu weyddiiyo ma lahayn goortaa. Sowma xusuusatid kolki aan sawirka galnay in aan ku iri “*waa aan sii baxayaa?*” Nafteyda miskiinta ah waa aad caawimeysay galabtaa. Waxa aad igu tiri “*anigaba waa aan sii baxayaa.*” Xaggii aan u dhaqaaqay ayaad adna u dhaqaaqday. Waa aan yaabay, balse kuma aan waydiin sababta. Alla isku qurux badneynaa kolki aan is garab soconnay! Mar kale ayaa aan yaabay. Isku gaariga kolkii aan sii noqonay ayaa aan sii fajacay. Kolkii aan kursiga gaariga kuwada fariisannay, dhanka daaqadda waa adigii xigay. Geesta aad xigtay ayaa aan aad u eegayay. Dhowr jeer oo aad isoo eegtay waxa aan ku iri “*qorraxdu marka ay sii dhacayso aad ayaa ay u qurux badan tahay.*” “*Sowma aha*” ayaa aad iigu war celisay. Alla jecleen lahaayaa in aad falaqeyn u gasho qorraxda si aan u dhagaysto codkaada bilaa xabeebta ah!

Isgoyska Benaadir ayaa aan mareynay kolkii aad gaariga gargaraacday si uu u istaago. Anigu ma ogeyn in aan halkaa mareynno. Adduun kale ayaa aan joogay. Farxad ayaa aan la muusooday kolki aan yaqiinsaday in aan isku meel ku dagaynno. Hadalkaadi koobaad ayaa ahaa “*halkan ayaa aan ku harayaa.*” Wax kale oo aad ku dari lahaydba waa anigii kaa soo dhex-galay; kuna iri “*anigaba halkan ayaa aan ku ekahay*”. Cod farxadi soo tuurtay ayaa aad ku tiri “*Oh! my god wallaahi*”. Horta maxaa aad u faraxday marki aan sidaa ku iri? Malaga yaabaa in aannu isku dareen ahayn, balse wax isku sheegashadu uu nagu adkaa? Haddaan la is yeelyeelayn jawaabtu waa haa.

Berigii dambe oo jacaylkeennu malabka ahaa ayaa aad habeyn iiga sheekeysay sababtaas iyo tii sawirkaba. Habeenkaas ma xusuustaa? Waxa uu ahaa habaynki aad ka carootay safarkaygii Hargaysa. Waa aad maseyrtay berigaa. Waxa aad ka masayrtay sawir. Sawir aan la galay gabdho. Waxa ay ahayd kolkii ugu horreysay ee la i duro. Kuuma sheegin weli arrinkaas. In aan safarkayga kaa dhaadhiciyo wakhti ayaa ay igu qaadatay habaynkaa. Dhulku aad ayaa uu qaboobaa waliba xilliga dambe ee uu fooraha soo dhaco ayaa uu ahaa. Derbi ah bannanka kore ee guriga ayaa aan ku tiirsanaa si aan loo maqal hinraaggayga iyo hiqda illinta iga qubaneysay. Kolkaa ayaa uu qabow i galay. Habaynka oo ay ka dhimmantahay laba saacadood oo kali ah ayaa aad i fasaxday igu na tiri “waa aan ku cafiyay.” Kolkiiba neefta ayaa igu dhegtay. Haddii aan kuu sheego in aad walwashaan ka baqayay. Xanuun baa aan dareemay aniga oo isla dhaxantii taagan. Waa la igu soo badanayay wixii intaa ka danbeeyay. Saaxiibkay Waddani ayaa isbitaal i geeyay subixii. Waa irbaddii ugu horreysay ee la igu muday inti aan noolaa. Waxa aan ula baxay “*durniinkii jacaylka*”. Intaa wixi ka dambeyay waa uuba igu soo badanayay. Jacaylku waa uu igu soo siyaadayay.

Dib aan kuugu celiyo sheekada. Gaariga waa tii aan ka degnay. Waxa aan isku qabannay lacagtii la siin lahaa “*kirishboyga*” cidda bixinaysa. Ugu dambeyn waa aad ku madax-adaygtay waa aadna bixisay. Kuuma ogolaan lahayn in aad bixiso balse waa aad iga hor dhaaratay. Farxad ayaa uu wadnaha ila garaacmay marki aannu isku jid sii noqonnay haddana. Waa aan rumeysan waayay. Adduukan isjecel ee la isla goobgoobayo ayaan ka fajacay. Wax kasta isla doonasha Alle ayaa ay ku socdaan galabta. Daliil uma baahna in ay isla doonasho Alle yihiin.

Haddii aysan ahayn maxaa aan isku guri u noqonnay? Maxaa isku gaariga nasoo saaray? Maxaa aan isku meesha ugu degnay? Bal sheeg adigu? Albaabka gurigii aan u wada soconnay marki uu wajahaaddeena kasoo muuqday ayaa aan mar qura isla niri waa kan gurigayagu! Kee, kee ayaa aannu isku la soo boodnnay haddana! Waxa xigay ma hebalkii la ii sheegayaybaa tahay iyo ma hebba ayaa tahay? Hab isma aynan siin laakiin si wacan ayaa aan isu salaannay. Albaabka ayaa aad garaacday. Hooyo Muraayad ayaa innaga furtay. Hadalkeedii ugu horreeyay ayaa ahaa, “*halkee ayaa aad iska soo hesheen?*” Jannada ayaa aan damcay in aan iraaho balse waa aan ka joogsaday. Horta jannadu soo meel qurxoon ma aha? Meel qurxoon ayaa aan iska soo helnay.

Imaatinkaagii guriga waa aan ka maqnaa. Afgooye ayaa aan dalxiis ugu maqnaa. In aad imaanayso waa aan ogaa oo warkaaga waa aan hayay, balse aqoon magacaaga dhaafsan kuuma aan lahayn. In aad sidan Malaa’ig duureed u tahay ma aan ogayn. Afgooye ma aadeene roog cas ayaa aan hoos dhigi lahaa diyaaraddii Ingiriiska kaa keentay. Allow nin aan wax ogeyn ha cadaabin.

Waxba ku dheeraan maayo sheekooyinkeennii hore. Waa aan ogahay haddii aan sii wado in aan ilmeynayo, mana rabo sidaas. Kobta aan joogo waa buur cidla ah oo ka korreysa magaalada. Magaalada quruxda badan ee Boorame. Waxa kaliye ee ii muuqda kolka laga yimaado dhulka, cirka iyo dhagaxaan badan oo kala nooc ah waa geed sogsog ah. Sida aan u cidloonayo ayaa uu u cidloonayaa. Geed kale kuma ag yaallo. Xasuuso ayaa aan dhex dabaalanayaa. Saddex sanno ka hor ayaa ay ahayd marki aad ii keentay kartoon dusha laga xar-dhay “*kaadoor*” oo ay gudaha ugu sii jiraan ubax guduudan iyo warqad yar. Warqadda waxa ku qornaa “*waan kaa helay*”. Hillaadda habeynkaana hoos ayaa ay kaga qorneyd.



Waa aan ka xumahay in aanan galabta hayn ubixii, balse waxa aan hayaa warqaddii yarayd. Alla far qurxanidaa! Habaynkaasi gees waa aan ka faraxsanaa dhanna waa aan ka xishoonayay, oo waxa aan ka qajilayay in ay xaafaddu ina ogaato. In jacaylkeennu caadyaal noqdo. Aroortii inta aadan soo kicin waa anigi kallahay. Qolkeyga ayaa aad garaacday waa aadna iga weyday. Adiga ayaa ii sheegay sidaas. Aniga oo niyadda kugu haya ayaa aad isoo wacday. “*Halkeed u kallahday*” ayaa aad igu tiri? “*Shahaado ayaa aan dalladda ka doontay*” ayaa aan kugu iri. “*waa yahay*” ayaa aad igu macasalaamaysay. Iga raalli noqo. Waxa ay ahayd maalinka kaliya ee weligay aan been kuu sheegay. Waxa aan ka quraacanayay hotel Safaari. Quraacda xaafadda ayaa aan ka xishoonayay. Waa sababtaa ta aan u kallahay. Waa isla sababtaa ta igu kalliftay in aan kuu sheego beenta.

Duhurkii, aniga oo aad u baqaya ayaa aan xaafadda ku soo laabtay. Waxa kaliya ee aan ka fakarayay waxa ay ahayd cidda albaabka iga furi doonta. Adiga ayaa ay ciddaasi noqotay. Go’ karis ah iyo diric baac weyna ah oo midabkaada soo saaray ayaa aad xirneyd. “*Sheydaanku kaa naaran ciyaalkeyga hooyadoodeey*” ayaa aan hoos u iri. “*Waa aad soo kululaatay*” ayaa aad ku xijisay salaam neef weyn la socotay oo aad iga qaadday. Qolkeygii ayaa aan usii gudbay. Alla udgoon badanaa. Sow kan iskaabulannimadi xalay uu ku seexday ka baxay ma aha! Dharki ayaa aan iska beddalay. Si degdeg ah weliba. Gal sawiraan oo aan Fahiima yar ka qaaday xalay ayaa aan koomadiinka kala soo baxay. Sawir aad adigu leedahay kala sii baxay. Sariirta ayaa aan dhabar daallan ku kala bixiyay. Indho aan toos kuugu eegi waayay adiga oo nool ayaa aan sawirki ku daawaday. Warqad ayaa barkinta ku hoos jirta. Oo yaa galiyay? Si loo arko gees yar ayaa laga banneeyay. Qofka sidan yeelay siyaasisanaa! Kor ayaa aan usoo qaaday. Waxa ku qoran “*caawa aan is aragno*”. Farta ayaa aan ka gartay cidda soo qortay. Waa adiga. “*Halkee*” ayaa aan iri sidii oo aad i maqlayso. Dhambaal ayaa taleefanka la iigu soo qoray. Wuu gariiray. Gariir gaaban oo farriin wada ayuu isla ruxay. Kanna aduu kaa yimi. “*Guriga ayaa aan ku kulmeynaa wixi ka dambeeye 8:00 fiidnnimo*” ayaa isna ku qoran. “*waa yahay*” ayaa aan iri mar labaad sidii oo aad i maqlayso.

Duhurkani waa uu igu kulul yahay. Hurdo ayaa i haysa. Barkinta ayaa aan madax timoweyn leh saaray. Dhanka darbiga ayaa indhaha u jeediyay. Sawirkaaga ayaa aan darbiga ku tiiriyay. Waan eegay. Wuu i eegay. Indhahaan isku qabtay. Waan kala qaaday. Wali wuu i eegayaa. Hurdaan damcay. Waan soo saari waayay. Naftaan khasbay. Daal i hayay baa i caawiyay. Hurdadii baa timid. Waan seexday. Sawirkaagu ma seexan. Aniga ayaa uu i daawanayay. Waan riyooday. Adiga ayaa aan kugu riyooday. Xeebtii baa aan joognay. Xeebtii aan isku barannay ayaan fadhinaa. Biyaha ayaa aan daawanaynay. Layr qaboow ayaa ciddiyaha lugahayga hoostooda salaaxaysay. Kuwaaga mooji. Biyaha ayaa aad dhex gashay. Waa aad luumbatay. Cabbaar ayaa aad maqnayd. Waa aan naxay. Waa aan salalay. Dhidid ayaa korkayga qooyay. Shaydaanka xunka ah ayaa aan iska naaray. Ma shaydaan baa halkaa ina geeyay mise jacayl? Waa jacayl. Isaga ma iska naaraa? Maya. Jacaylka waa aan

jeclahay. Dadka xataa isaga jecel waa aan jeclahay. Sawirkaagii darbiga ku tiirsanaa ayaa aan dib u eegay. Weli wuu i eegayaa. Masaajidka ayaa laga addimay. Diiq ayaa ka daba qayliyay. Waa aan istaagay. Musqusha xaggeeda ayaa aan aaday. Qaddar yar dabadeed ayaa aan kasoo baxay. Waa aan waysaystay. Salaaddii casar ayaa aan u luuday. Waa aan soo tukaday. Galab dheer ayaa ii bilaabantay.

Galabta jawigu waa meel dhexaad. Hoos galbeed ka dhashay darbiga guriga ayaa aan harsanaynaa. Waa aniga, adiga, hooyo iyo walaalkaa. Shaah ayaa la cabbayaa. Adiga ayaa kariyay. Alla macaanaa. Waa aad isoo hor fariisatay. Waa aan ku eegi waayay. Waa aad i eegi wayday. Sheekaa bilaabantay. Qaybtaydii waa aan ka qaadan waayay. Horta ma adiga ayaa afka igu dhagay? Mooji. Jacayl baa afka igu dhagay! Qorraxdii ayaa gadaashaada ka wareegtay. Way guduudatay. Way ku cawartay. Waad isku soo baxdeen. Way sii daciiftay. Godkeedii ayaa ay afka saartay. Masaajid ayaa laga addimay. Meeshii ayaa aan ka huleelnay. Salaaddii makhrib ayaa loo dareeray. Waa aan aaday. Soo tukaday. Soo noqday. Qolka galay. Ku nagaaday. Cishaa'i la eedaan. Aaday.

Markii aan ka soo laabtay salaadda cishe, barxadda kore ee guriga ayaa aan qabanqaabo ka dareemay. Waa 7:57pm. Laba daqiiqo ayaa ballanti ka dhiman. Wadnahu maxaa uu u boodboodayaa? Ma ogi. Malaha waa cabsi. Giriir ka soo yeeray taleefanka ayaa cabsidii garaaca wadnaha uga sii dartay. “*Waa lagu sugayaa hee*” ayaa aad si qosol leh u tiri. “*Maxaa aad ii sugaysaa*” ayaa aan damcay in aan ku iraaqdo. Iska daayay. Lugo aan sidi karin culayskayga ayaa aan kor kusoo fuulay. Maxaa xigay?

Kursigu asal ahaan waa uu caddaa balse waxaa midabdoorriyay marada dusha laga saaray oo malahayga aad la eegatay shumaca guduudan ee hareeraha ka shidnaa. Markii adiga lagu gu daro waxaa soo baxay midab aanan qoraalkan ku sawiri karin. Laba koob oo aad u qurxan ayaa labada gees ka kala saarnaa miiska warreega ah. Cabitaan qare la shiiday ah ayaa ka dhaansanaa. Si deggan ayaa aan u fariistay kursi ku qumman wajigaada oo aad ii sii dhigtay. Dhidid ayaa ay luguhu ila qoyan yihiin. Waa aan baqayaa. Waa labadeenna kaliya. Waa labadeenna is jecel oo kali ah. Si aqomeysan ayaa aan uga wada hadalnay arrinkii aad fadhigaa u diyaarisay. Arrinkii ahaa gundhigga jacaylka adduunkeenna iyo mustaqbalkiisa. Aad baa aan ugu farxay in ay is lahaayeen muuqaalkaada iyo mugga oraahdaadu.

Toddobaad ayaa hamaynkaa laga joogaa. Safarkaygii Boorame ahaa ayaa la saadaalinayaa. Berri waa in aan suuqa aadaa. Waa in aan si kama danbays ah u soo adeegtaa. Adigu waa in aad i raacdaa. Suuqa Bakaaraha waa in aan tagnaa. Waa in aad catarada iyo maryaha midabbadooda ii dookhdaa. Sidan ayaa aan ku ballansannahay. Sidii ay ballantu ahayd ayaa ay u dhacday. Horta dookhaagu wanaagsanaa? Dookh-digaag ma tihid. Waa aad soo saartay maryihii isoo saari lahaa. Waxa aan maqli jiray: Quruxdaada indhaha ku jecel oo qudha ayaa arka.

Waa subax axad ah oo maalmaha kale iiga duwan. Awoodda ugu badan ee nafsaddaydu dareemayso hadalkaada ayaa aan ka helay. Dardaarankaada ayaa i geyeysiiyay xooggan saa'idka ah. Geesi ayaa aan ahaa subaxan aan u baxayo Boorame. Ujeeddada safarkayga si wacan ayaa aad u og tahay. “*Bishan tan xigta 13-keeda ayaa aan laabanayaa*” baa aad igu tiri. “*Oo maxaad u noqonaysaa?*” ayaa iga soo fakan gaartay. “*Alle ha ku nabad celiyo*” ayaanse samir taagwaa ah ku iri. Qolka fadhiga ayaa aan fadhinay. Dhinacaaga midige ayaa aan fadhiyay. Farahaaga ayaa aan ku ciyaarayay. Waqtigii aan tegi lahaa ayaa la gaaray. Sidan ma jeclayn. Subaxaas way degdegaysay saacaddu. Waa aad i dhunkatay. Waxa aan u maleeyaa goor waliba in uu dhabankeyga ku sawiranyahay midabkii

bishimahaaga. Weli ma illaawin shumiskaadi. Indha naxariis leh ayaa aad igu eegeysay kolki aan albaaka ka sii baxayay. *“Marka aan Ingiriiska ku laabto ayaa aan taleefan qaadanayaa. Lambarkaaga dusha ayaa aan ka qabtay intii aan wada joognay. Aniga ayaa kusoo wacaya gacaliye”* hadalkaagi subaxaas intii u dambeysay ayaa ahaa sidaas. Mar aan dib kuu soo jalleecay indhaha baalashooda ayaa aad isu yara gaysay. Horta maxaad ka wadday? Ma xishood ayaa ay kaa ahayd mise xarrago? Mooji!

13ki Janaayo ayaa aad iga soo wacday garoonka Aadan Cadde. *“Xabiibi waa aan baxayaa. Aniga ayaa ku soo siin doono lambarkayga”* ayaa aad igu tiri, hadal meel buuq badan laga dhex yiri. *“Waa yahay”* ayaa aan ku iri. Dhabankayga ayaa aan qoyaana ka dareemay. Ma garan karo sababta ay illintu ii soo dhaaftay. Ma waxa aan ka xumaa in aad masaafu dheer iga fogaato? Ma waxa ay naftaydu sii ogeyd bilihii qaraaraa ee ka dambeeyay subaxdaas? Moojiye wallaahi waa aad i cidleysay.

Maalinkaas wixi ka dambeeyay waxa ii bilowday saddex bilood oo aad u qaraar. Qaraarka waxaa ka dhigay la’aantaada. Hadalkaagii ayaa aan waayay. Ballankii ayaa aad iiga baxday. Ima aadan soo wicin, imana aadan soo raadin. Lambarkaagi ima aadan soo siin. Waxaa caado ii noqotay in aan kali ahaado. Waa aan ugaarobay. Dadki ayaa aan ka dhex baxay. Wehelka kaliya ee aan haystay waxa uu ahaa sawirkaada. Sawirkii aan kugu gaaday subaxii isugu kaaya danbeeyay. Labada suul ayaa aan taleefanka muraayaddiisa isugu geyn jiray si aan u soo dhaweysto. Indho ay illini buuxisay ayaa aan ku eegi jiray maalmaha qaar. Maalin waliba buuggayga feegaarka ayaa aan ku sawiri jiray. Qalin qoriga iyo buuggu waa ayba is dul yaalli jireen.

Buuraha magaalada Boorame ayaa guri ii ahaa. Halkaa ayaa aan ku nafisi jiray. Ma rumeysan karaysid in aanu ey daris isu wanaagsan noqonnay. Jacaylkaaga ayaa i baray in eygu uu saaxiib wanaagsan yahay haddii laga keensado. Tani waa faa’iidada ugu yar ee aan barashadaada iyo jacaylkaaga ka dheefay. Marka aan dayaxa daawanayo waxa uu iga waardiyayn jiray dhurwaayada. Si kasta waa aan kuu baafiyay. Wakhti badan ayaa aan kaa welwelay. Jeero badan ayaa aan codkaaga naawilay. Heeso ayaa ugu badnaa qalabkii aan kugu baafiyay.

Waa hamayn roobaad. Cirku aniga iima uu danayn. Roobakan ma rabo. Hoygaygii ayaa uu iga horjoogsaday in aan joogo. Buurtii ayaa uu igu helay. Wuu i qooyay oo i qaboojiyay. Waa aan iska soo luuday. Timihii ayaa garbahayga ku soo degay qoyaana dartii. Xaafaddaydii ayaa aan soo gaaray. Waa meel aan nebcabay oo buuq badan oo dhalinyaro badan. Waa in aan is maaweeliyaa. Waa in aan baafintii sii wadaa. Waa in aan qolyihii baafintii hore iga qaaday canaantaa. Waa in aan noloshaada shaki galiyaa. Maxay farriimahaygu kuu soo gaari waayeen? Malaha ma noolid! Dadka aakharo farriin ma loo diri karaa? Mooyi. Intan ayaa ka mid ahayd hees aan qoray hamaynkaa.

Inta samada duushiyo,

Suxufiga wax qora iyo,

Kuwa saadaaliya cimilada,

Saynisyahan, dhammaantood,

Akhbaartaada siiyee,

Inaan wali silcaayoo,

I surmeeyay caashaqu,
Maan salawgu kuu imman,
Sidaan ahay laguu tabin,
Mise wey ku seejeenoo,
Dunidaadba saarneyn?

Habeenkan aan curinayo heeskaa, ayaa aad isoo wacday. Ma aqaan cidda kuu sheegtay in aan kuu heesayo oo horay kuu gu sheegi wayday. Hamaynka xilligiisii danbe ayaa aad isoo garaacday. Garabdaar ayaa ila shaqeeyay habenkaa. Xaqiiq. Cidda farriinta kuu keentay cid kale ma ahayn. Waa isaga. Waa garabdaar jin iyo insi waxa uu yahay aanan aqoon. Taleefankaygu markii uu soo dhacay, waa aan dareemay in ay qeyb jirkeyga ka mid ah isoo tilifoonisay. Lambarka ayaa aan garan waayay. Waa Ingiriiska. Waa aan qabtay. Cabbaar ayaa aad iga aamusneyd. Anna waan iska aamusnaa. “*Dear*” ayaa aad igu tiri. Indho ay ilmo buux dhaafisay ayaa aan mar kale ku eegay taleefankayga.

Kolkaa ayaa aan fahmay in aad adigii tahay. Kolkaa ayaa aan ogaaday in ay tahay nolosheyda cidda ila hadlaysa. Kolkaa ayaa aan ogaaday in aan helay qeybtii jirkeyga ka maqneyd. Waxa aad isku dayday in aad i aamusiiso, wax kastana aad i illowsiiso. Indhahaygu xiisa uma aysan qabin in ay ooyaan, laakiin illinti murugada mid ka duwan ayaa ay caawa qubayaan. Waa illin farxadeed! Wax badan iyo waayo badan ayaa aan iska waraysannay. Sababta aad ii goysay ayaa aan ku wayddiiyay. Cududaarro tiro badan oo tayo yar ayaa aad iska soo jartay. Habeynkaas oogga ayaa isugu keen dillaacay. Anigu sidaydii ayaa aan ku baxay oo jaamacadda ku aaday. Adigase wakhti yar ayaa kuu harsanaa oo saacado ayaa waaberiga kaa xigay. Malaha waa aad yara seexatay. Subaxaasi, jaamacadda iyo dadka joogaba waa ay qurux badnaayeen. Maxaa ay u quruxbadnaayeen subaxdaas, subaxyada kalena u foolxun yihiin? Mooji! Ummuuro jacayl u malee. Eygi aannu saaxiibka ahayn ayaa aan u sheegay in aan dib kuu helay. Itaalka ka farxi ayaa aan is lahaa.

Uma malaynayo se, in uu luuqaddayda fahmayay. Sidaa waxa aan u yeelayay uun, saaxiibkaagi murugada kula qeybsan jiray la wadaag farxaddaada! Waxa ay howshani ahayd waajib aan gudanayay. Maalinkaa wixii ka dambeeyay nolol macaan, oo jacayl iyo naxariis miiran ah ayaa aad ii furtay. Dhan kasta oo nolosha ka mid ah ayaa aan ka wada sheekeysannay. Is fahamnay. Waa tii aan Qur’aanka kuu billaabay oo kuu dhammeeyay. Maskax furan oo fiican ayaa aad leedahay. Waa tii aan ku baray nolosha akhriska iyo la saaxiibidda buugga. Mucaashaqiin, kala fog niyaddana is kala nool ayaa aannu ahayn wakhti dheer.

Alla maxaan isku faraxsaneyn. Inta ay qorraxdu soo jeeddo iyo inta ay huruddo, ugu yaraan shan (5) saacadood ayaa aan sheekeysan jirnay oo wax is bari jirnay. Innaga oo wali isku oomman ayaa aan kala seexan jirnay. “*Taleefanka dhig*” iyo “*adigu dhig*” ayaa aan isku qabsan jirnay. Muuqaal ayaa aad jecleyd in aan ku wada sheekaysanno. Skype ayaa aan ka wada xiriiri jirnay. Waa halkaa meesha aan Quraanka kaaga dhigi jiray. “*Dugsiga muuqaalka*” ayaa aan Skype ku naanaysi jirnay.

Qoraalkan ma sii wadi karo. Waa aan ku qasbanahay in aan joojiyo. Ma rabo in aan ilmeeyo. Caawa waa 17 Oktoobar. Dhan marka laga eego, waa habeyn qiimi badan, dhan kalena marka laga fiiriyo waa hamayn aad gabi ahaanba ku duushay nolosheyda. Dagaal gaadmo ah ayaa aad ku qaadday qalbi

dhowr jeer naxash la saaray. Hubka qalbiyada lagu gumaado ee mamnuuca ah ayaa aad ii adeegsatay. Dhan waa habeyn qiimi badan, oo waa habeynkii aan is barannay saddex sanno ka hor. Dhanna farxaddeydii ayaa aad burburisay oo waa hamaynkii arooskaaga saddex sanno kadib isbarashadeennii. Rajadeydii nolosha ayaa aad jar ka tuurtay. Waxba yaan ku eedeyn. Nasiibkaa kolkol sidaa dhala!

Inta aan hamaynkaan naxdinta leh la soo gaarin ayaa ay wax badani khaldameen. Sidii aan u joogay ayaa aan juuqdaa waayay. Baryo dhan ayaa aan cinwaannadaada farriin iyo fiirfiirin la dul joogay. Jawaab iska daaye “Online”-ka ayaa aan kaa waayay. Mar kale ayaa aan noloshaada shaki galiyay. Intaa iguma aadan dayne xannibaad ayaa aad i saartay. Caku iyo “block”! Yaa hindisay? Haba la hindisee maxaa aan ku galabsaday oo madaxa la iiga saarayaa? Mooji! Bil ayaa aan xaalad iswaa ah ku sugnaa. Hamayn madow oo nasiib madow oo jacaylkaygii madoobeeyay ayaa aad qoraal ii soo qortay. Ma rumaysan kolkii hore in aad adiga tahay qofka qoraalkan madoobi ka yimid. “Salaad kasta oo aan tukado waxaan Alle ka baryaa in uu iga dhaafo gefkii aan kaa galay. Walaal iska kay illow. Qof wanaagsan oo jacayl wanaagsani naga dhexeeyay ayaad ahayd. Jacaylkaasi waa uu dhammaaday oo dhowaan marwo ayaa aan noqonayaa. Qoyskayga ayaa nin aan qaraabo nahay igu daray. Sidan ma jeclayn ee waa amar xagga waalidka ka yimi oo aan aqbalaaddiisa ku khasbanahay. 17 Oktoobar ayuu arooskaygu dhacayaa. In aan kugu casuumo waa aan jeclaa, balse ma suurogalayso. Nabadgalyo walaal. Mar kale waxa aan kugu la talinayaa in aad iska kay illowdo.” Sidan ayaa ay farriintaadu u qornayd. Alla naxariis daranidaa? Sidan qof u qallafsan kuguma ogayn. Alla beerka!

Hambalyo saaxiib. Caawa [oo aan qorayo sheekadan] waa aqal-galkaaga anna waa qalbi jabkeyga. Caawa laga bilaabo waxa aad noqoneysaa gabar guri leh. Marwo geesi leh. Waxa aad gabi ahaanba macsalaameyneysaa noloshi kelinimada. Iskaabulonimadu waa cadaab. Waxa aad galeysaa nolasha lammaanaha. Reernimadu waa janno. Xilligan wixii ka danbeeya waxa aad ka fekereysaa seygaada iyo gurigaada. Waxa aad yarayn doontaa isticmaalka baraha bulshada in kastoo aadan horayba ugu badneyn. Waxaa lagu gu wacayaa berri wixii ka dambeeya “xaaskii hebal”. Bilo kaddibna waxa aad noqon doontaa hebel hooyadii ama hebla hooyadeed. Jir ahaan, dabeecad ahaan, aragti ahaan waa aad is beddeli doontaa. Nolosha lammaanka ahi iyada ayaa saameynteeda wadata.

Jacaylkaagi ka sokoow, waxa aan ahay macallinkaagi. Waxa aan kuu rajeynayaa farxad, guri barwaaqo ah, ubad baarriyaal ah iyo sey kuu qaddariya sidi aan aniga kuu qaddarin jiray, kuu koolkooliya sidii aan kuu ballanqaadi jiray, wanaagna kuu fara sidii aan kuu sheegi jiray.

Kuma illaawayo. Waa ballan. Oo ma ku illaawi karaa? Waxa aad tahay Malaa’ig duureed. Sidii ayaa aan weli kuu jeclahay kuuna jeclaan doonaa!